



Xog Muhiim ah oo ku saabsan Cuntooyinka Dugsiga Cunugaaga

Haddii cunug kuu dhigto dugsiga barbaarinta ilaa fasalka laba iyo tobnaad kaasoo kugula nool guriga kaasoo helaayay cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban intii dugsigu furnaa, cunugaagu wuxuu u qalmaa barnaamijka U wareejinta Gunada dhanka Oonleena Aafada cudurka awgeed (P-EBT) si uu u helo gunooyinka Barnaamijka Caawimaada Kaalmada Nafaqada (Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP)) sabab la xariirta in dugsigu xiran yahay.

Waa maxay gunooyinka cunugu heli doono?

Qiimaha gunooyinka ayaa ah \$5.70 halkii cunug ba maalin kasta oo dugsiga la dhigan lahaa cunuguna uu xaq u lahaan lahaa cuntooyin bilaash ah ama qiimo jaban inta u dhaxaysa Maarso 17, 2020 ilaa Maajo 29, 2020.

Qasab miyay igu tahay inaan aqbalo aana isticmaalo kaarka?

- » Maya, ka qaybgalkaaga barnaamijku waa mid ikhtiyaari ah.
- » Haddii aad doorato inaad ka qaybgalin, fadlan burburi kaarkaaga adoo ka jaraaya qaybta badhanka birlabta ah leh kaarkana ku tuur meel aan la arki karin.
- » Haddii aadan doonayn kaarka, ma awoodi doontid inaad hesho gunooyinka cuntada, mana siin kartid kaarka qof kale.

Sidee ayaan u adeegsan karaa gunooyinka?

Gunooyinka waxaa loo adeegsan karaa in lagaga iibsado noocyada cuntada dukaanada raashinka/tafaariqleeyda aqbashaha Ohio Direction Card (Kaarka Adeegga ee Ohio) (oo sidoo kale loogu yeero kaarka EBT).

Haddii cunugu hadda qaato SNAP:

- » Marka la gaaro dhammaadka Maajo, gunooyinka P-EBT ayaa lagu dari karaa koontada SNAP ee ardaygu gunooyinka ku qaato.
- » Haddii aan ardayga la waafajin karin koontadiisa shaqaynaysa ee SNAP, waxaa lagu soo diri doonaa kaarka P-EBT oo magaca cunugaagu ku yaalo.

Haddii cunugu uusan hadda qaadan SNAP:

- » Marka la gaaro bartamaha Juun waxaad heli doontaa kaarka P-EBT oo gunooyin cunto ka buuxaan kaasoo laguusoo dhigaayo boostada. Kaarku wuxuu ku qoraa doonaa magaca cunuga, laguma qoraayo magaca waalidka ama masuulka. Tilmaamaha kusaabsan sida looga shaqaysiiyo kaarka ayaa kujiri doona.

**Hadii aad wax su'aalo ah qabto,
fadlan la xariir 1-866-244-0071.**